



**Shabakadda Korriinka Hore ee Nebraska** ayaa diyaar u ah carruurta da'doodu u dhaxayso dhalashada ilaa saddex jir kuwaas oo leh dib u dhac korriin ama naafonimo. Haddii aad ka shakisan tahay in ilmahaaga ama ilmo aad taqaano uu dib u dhac korriin ku yimid, fadlan wac lambarka degaanka ee hoose.

**La xiriir:**

**Nebraska Early Development Network (Shabakadda Korriinka Hore ee Nebraska)** waxaa lagu taageeraa dadaallada wadajirka ah ee ay wadaan Nebraska Department of Education (Waaxda Waxbarashada Nebraska) iyo Nebraska Department of Health and Human Services (Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Nebraska).



**Nebraska Early Development Network**

Babies can't wait

# Isku-dubbaridka Adeegyada



**Nebraska Early Development Network**

Babies can't wait

Booqo mareegteena: <http://edn.ne.gov>

Nuxurka ku qoran dukumeentigan waxaa lagu soo saaray deeq ka timid Waaxda Waxbarashada Mareykanka, H181A200033.

EI-PAM-2 (99073) Dib loo eegay 09/2022



## Waa maxay Korriinka Hore Isku-dubbaridka Adeegyada Shabakadda?



Isku-dubbaridka Adeegyada waxaa loola jeedaa waa qof xiriiriye dhexe ah, oo loo yaqaano isku-duwaha adeegyada, ayaa loo magacaabi qoys kasta. Isku-dubbaridka Adeegyada waxay caawisaa qoysaska haysta carruurta qaba baahiyaha gaarka ah oo da'doodu ka hooseeysa saddex jir:

- ✓ Hel adeegyada lagu daboolayo korriinka, waxbarashada, dhaqaalaha, daryeelka caafimaadka, daryeelka ilmaha, daryeelka nasinta, iyo baahiyaha kale;
- ✓ Ku xirnow adeegyada loo baahan yahay;
- ✓ La shaqee bixiyeyaal badan si aad u hubiso in adeegyada loo bixiyo sidii loogu baahnaa; iyo
- ✓ Noqo isku-duwaha adeegyada loogu talagalay carruurtooda mustaqbalka.

## Hawlaha Isku-dubbaridka Adeegyadda

- ✓ Kaalmaynta waalidiinta dhalay carruurta u-qalma inay helaan galaangalka adeegyada wax-ka-qabashada hore ee loo baahan yahay iyo adeegyada kale ee lagu aqoonsaday Individualized Family Service Plan (Qorshaha Adeegga Qoyska ee La Gaar Yeelay, IFSP);
- ✓ Samaynta u gudbinta bixiyayaasha adeegyada loo baahan yahay iyo qorshaynta jadwalka ballamaha loogu talagalay carruurta iyo qoysaskooda u-qalma;
- ✓ Isku-dubbaridka adeegyada wax-ka-qabashada hore iyo adeegyada kale (sida adeegyada waxbarashada, bulshada, iyo caafimaadka) ee loogu talagalay carruurta u-qalma;
- ✓ Isku-dubbaridka baaritaannada (haddii ay habboon tahay), falanqaynta, iyo qiimaynaha;
- ✓ Fududeynta iyo ka qayb qaadashada korriinka, dib-u-eegista, iyo qiimaynta IFSP-yada;
- ✓ Isku-dubbaridka, fududaynta, iyo kormeerida bixinta adeegyada si loo hubiyo in adeegyada lagu bixiyo qaab waqti ku habboon;
- ✓ Ogaysiinta qoysaska ilaalinta xuquuqdooda iyo habraacyadooda; iyo
- ✓ Fududeynta samaynta qorshaha u guurista dugsiya barbaarinta ama adeegyada kale, haddii ay habboon tahay.

## Yay Tahay Cidda U-qalanta Isku-dubbaridka Adeegyada?

Qoysaska u qalma waa kuwa haysta dhallaan ama socod-barad ay da'doodu ka yar tahay saddex kuwaas oo xaq u leh adeegyada sababo la xiriira naafonimo ama dib u dhac korriin.

**Isku-dubbaridka adeegyada sanadka oo dhan ayaa la bixiyaa. Ma jiro wax kharash ah oo lagu dalacaayo qoysaska.**

